

SIDA LOOGA SOO WARBIXIYO CUNSURIYADA IYO TAKOORIDA DUGSIGA ILMAHAAGA



Somali

Ilmahaagu wuxuu istaahilaa in la ixtiraamo, qadariyo oo loola dhaqmo si la mid ah bulshada dugsiga.

Takoorida iyo xumaynta ku salaysan diinta ama jinsiyada looma dulqaadan karo.

Haddii aad tahay waalidka ama daryeellaha ilmo ay ku dhacday ama arkay cunsuriyad diimeed iyo jinsi ama dhibaatayn dugsigooda ka dhacday, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad soo sheegto.

Shaqaalaha dugsiga ayaa xaqiijin kara ficalka ku haboon kaalmo ayaana la bixiyaa.

Waxaa laga yaabaa inaad samayn lahayd ashtako rasmi ah oo ku saabsan dhacdada shilkii dugsiga ama xafiiska gobolka.

Macluumaad intaas ka badan, arag:

[Samay ashtako ama walaaca ku saabsan dugsigaaga
\(education.vic.gov.au\)](http://Samay_ashtako_ama_walaaca_ku_saabsan_dugsigaaga_(education.vic.gov.au))

KA WARBIXI ASHTAKADA DHACDADA KU SAABSAN KHADKA CUNSURIYADA EE FURAN (REPORT RACISM HOTLINE)

Report Racism Hotline

1800 722 476

report.racism@education.vic.gov.au

Waxaa la heli karaa Khadka-furan laga bilaabo 9ka subaxii ilaa 5ta galabtii Isniinta ilaa Jimcaha, oo aanay ku jirin maalmaha fasaxa.

Haddii aadan ku qanacsanayn inaad ka warbixiso dhacdada shilka ilmahaaga dugsigiisa, ama haddii aadan ku faraxsanayn jawaabta dugsiga, waxaad la xiriiri kartaa Wasaarada Report Racism Hotline Khadka-furan ee warbixinta Cunsuriyada Wasaarada

Markaad wacdo Khadka-furan, waxaad awoodi doontaa:

- inaad kala hadasho samaynta dacwad
- qadari xalalka la heli karo iyo wixii markaas ka dib aad samayn karto
- ka raadi caawo saraakiisha gobolka iyo adeegyada kaalmada.

HEL KU TALABIXINTA TELEFOONKA IYO KUNA CAAWIN KHADKA WAALIDKA (PARENTLINE) KHADKA WAALIDKA

Parentline

13 22 89

www.parentline.vic.gov.au

Khadka waalidka (Parentline) waxaa la heli karaa laga bilaabo 8da subaxii ilaa saqda dhexe, todobada berri ee asbuuca, oo ay ku jiraan maalmaha fasaxa.

Waxaa kale oo laga yaabaa inaad doonayso inaad la xiriirto Parentline Khadka waalidka Parentline si aad u raadiso talasiin iyo kaalmada qof aqoonteeda leh kaas oo ka madaxbanaan Wasaarada.

Khadka waalidka (Parentline) waa qarsoodi iyo talasiin dahsoon oo ah adeega telefoonka waalidiinta iyo daryeellayaasha carruurta dhalatay ilaa kuwa jira ilaa 18 sanadood.

Talabixiyayaal ayaa la heli karaa si loogala hadlo arrima badan oo ku saabsan korinta, kuwaas oo ay ku jiraan cunsuriyada ama dhibta ka dhacday dugsiga.

MACLUUMAAD MUHIIMA

Macluumaad intaas ka badan oo ah ka warbixinta cunsuriyada diimeed ama dhibta dugsiyada arag:
[Soo sheeh cunsuriyada ama takoorida diimeed
\(education.vic.gov.au\)](http://Soo_sheeh_cunsuriyada_ama_takoorida_diimeed_(education.vic.gov.au))

Macluumaad intaas ka badan iyo agabyada ku saabsan ka jawaabida u xoog sheegashada, oo ay ku jirto u-xoog sheegasho cunsuriyaysan, ka eeg:
[Joojiyayaasha u xoogsheeshada
\(education.vic.gov.au\)](http://Joojiyayaasha_u_xoogsheeshada_(education.vic.gov.au))



Adeega Tarjumida-qoraalka iyo Afcelinta Qaranka (TIS)

Waaliidiinta iyo daryeellayaasha u baahan adeega tarjumida waxay la xiriiri karaan Wasaarada ama Parentline (Khadka waalidka) iyada oo la wacayo Khadka Fasirida iyo Adeega Tarjumida (TIS) 13 14 50.